

kulanka world café

kulanka 1aad

**Qaxwada Dunida (World Cafes)
Arbacada May 28ka, 2008
Saacada: 6pm-9pm**

Buchan Building

1011 SW 12th Avenue

Portland, OR 97205

Ka soo gal wadada Salmon St ee u dhow streetcar, Max iyo bus mall

kulanka 2aad

**Qaxwada Dunida (World Cafes)
Sabtida May 31ka, 2008
10:00am-1:30pm**

Mt. Scott Community Center

5530 SE 72nd Avenue

Portland, OR 97206

Bus# 10 ama 14

**Fadlan is diwaan geli ka hor maalinta
Jimcaha (May 23ka), la soo xiriir
Cassie Cohen:
(503) 823-9585;
email: cassie.cohen@ci.portland.or.us
ama boostada:**

**Vision into Action
c/o Bureau of Planning
1900 SW 4th Avenue, Suite 7100
Portland, OR 97201**



**Duqa Magaalada Tom Potter iyo
Midowga Indheergratada iyo Hor u
socodka Waxay kugu Martiqaadayaan
in aad kala soo Qaybgasho:**

**Ka dhiibo aragtidaada/fikaradaada ku saabsan suurta gelinta
ama hirgalinta xarun dhismo oo ay ka dhaxayso dadwaynaha
dhaqamada iyo hidaha kala duwan leh; Xaruntaasoo noqon
karta meel ay ku kulmi karaan shacab dhaqamo kala duwan
leh oo ka kala yimid waddamo kala duwan.**

Waa Maxay Xarunta Ay Ku Kulmayan Dadka Dhaqamada Kala Duwan Leh?

Baahida loo qabo Xaruun ay ku kulmaan dad dhaqamo kala duwan leh waxay ka timid xog uruurin ama daraasaad ay sameeyeen Xafiiska Arigtida Bulshada ee Portland iyo gudi ay magaalada Portland u magacawday arimaha dadka qaxootiga iyo kuwa soo haajirayba.

Daraasaadaas waxaa lagu qeexay baahida loo qabo in la helo xarun ay ku kulmaan dadka dhaqamada kala duwan leh ee gobolkan ku nool, si loogu abaabulo, looguna wacyi galiyo bulshada gobolkan ku nool iyo in lagu tababaro hogaamiyayaasha cusub ee matalayaa dadyowga dhaqamada kala duwan leh.

Dhamaan dadkii xogta ama warbixintan laga soo uririyey waxay isku raaceen baahida loo qabo xarun noocan ah oo bulshada dhaqamada kala duwan leh ay ku kulmaan iskuna arkaan.

Waa Maxay Qaxwada Dunida (World Cafés)?

Qaxwada Dunida waa fursad loogu talo galay in dadka dhaqamada kala duwan leh ee ku nool magaaladan Portland ay ka wada hadlaan sida xaruntan aan kor ku soo xusnay ay uga wada faa'iidayaan lahaayeen. Waxay kaloo fursadan suurto gelinaysaa in dadkaa maalintaa kulmaya ay koox koox u wada hadlaan, si xeeladii ama farsamo ku jirto ay fikradahooda qaaliga ah u dhiibanayaan ooraah ahaan ama sawir gacmeed ahaan hadba middii u fudud.

Waxaa Kaloo Jirta

- Cunto iyo cabitaan fudud
- Caruurtaada waad soo kaxaysan kartaa; Fadlan nala soo xidhiidh si aan u ogaano tirada caruurta aad soo kaxaysanayso iyo da'dooda
- Hadii ay luqadda Ingiriisiga kugu adag tahay, fadlan soo kaxayso qof saaxiibkaa ama aad qaraabo tiihin oo kuu tarjuma
- Yar iyo wayn, curyaan ama cagoole, ajanabi, bulshada inteeda kale oo dhaqamada kala duwan leh madow iyo cadaan, waxaa lagu dhiiri galinayaa qof kastaa in uu ka soo qayb galo
- Waa muhiim in aad waqtiga aad dhowrto si ay kuugu suurto gasho in aad ka qayb qaadato xafladda inteeda badan

